GUDDIGA WAALIDKA IYO GOLAHA WADASHAQAYNTA EE XANNAANADA CARRUURTA

Buugyare ku saabsan sida uu maammuluhu wax u maareyn karo, waalidkuna uga qaybqaadan karaan arrimaha xannaanada carruurta.

Waxaacarruurta u roon in dantaguud laga shaqeeyo

FORELDREUTVALGET FOR BARNEHAGER
fub

Xeerka

Wadashaqaynta guriga iyo xannaanada carruurtu waxay ku qoran tahay xeerka xannaanooyinka carruuraha:

§ 1: HADAF
«Xannaanada carruurta oo wadashaqayn iyo fahan la leh guriga ayaa ilmaha u hubinaysa baahidooda daryeelka iyo ciyaarta, hor-ummarinaysana waxbarashada iyo ababinta gundhigga u noqonaya horummar dhinac walba ah.»

§ 4: GUDDIGA WAALIDKA IYO GOLAHA WADASHAQAYNTA
«Si loo hubiyo wadashaqaynta guriga ilmaha, waxaa loo baahan yahay in xannaano carruur oo kasta in ay lahaato guddi waalid iyo gole wadashaqayn.»

Waa in waalidka loo gudbiyaa arrimaha muhiimka ah

«Mulkiilaha xannaanada carruurta ayaa hubinaya in arrimaha muhi-imka ah loo gudbiyo guddiga waalidka iyo golaha wadashaqaynta.»

«Waa muhiim in ay jirto madal ay waalidka oo dhan ku kulmi kara-an – halkaas oo ay isku weydaarsan karaan arrimaha xannaanada carruurta oo ay ku wadahadli karaan.»

Guddiga waalidka waxaa laga rabaa:
- In ay ka shaqeeyaan danta guud
- In ay gacan ka geystaan in wadashaqaynta xannaanada carruurta- iyo waalidku ay abuurto bey'ad xannaano carruur oo wanaagsan
- In ay doortaan dadka ku matalaya guddiga wadashaqaynta

Guddiga wadashaqayntu wuxuu:
- Ka koobnaanayaa tiro isla eg oo ka kala timid waalidka, shaqaalaha iyo mulkiilaha
- Ahaanayaa unug tala-bixin, xiriir abuuraya iyo hawlaha isu duwaya

FUB wuxuu ku talinayaa

Mas'uuliyadda maammulaha ka saaran guddiga waalidka iyo golaha wadashaqaynta:
- In uu shirarka qabanqaabiyo lana socdo wadashaqaynta
- Ka warbixiyo arrimaha markaas taagan
- Hawlaha baraatikada ah isku dubarido
- Goobo lagu shiro oo joogto ah
- Guddoonka iyo sii gudbinta fikradaha waalidka

Warbixin fiican
Waalidka iyo carruurta labadaba is-beddel weyn ayuu ku yahay billaabidda xannaanada carruurtu, waalidkuna dabcan carruurtooda ayay muddada ugu horreysa ku mashquulsan yihiin. Si ay haddaba waalidku u noqdaan kuwo firfircoon oo si la siman yahy ula shaqeeya xannaanada carruurta, waa in waalidka furitaanka hore ee xannaanada carruurta warbixin fiican laga siiyaa xaqooda iyo mas'uuliyadda ka saaran guddiga waalidka iyo golaha wadashaqaynta (SU). FUB wuxuu ku talinayaa in golaha fulin waalidka (FAU) loo sameeyo waalidka loo doorto in ay ku biiraan guddiga waalidka. FAU wuxuu noqon karaa unug u hadla islamarkaana dhaqaajiya fikradaha iyo waxyaalaha ay waalidku xiisaynayaan.

Xayndaab wanaagsan
Hawlaha FAU iyo kuwa golaha wadashaqayntu waa in ay xayndaab wanaagsan lahaadaan si loo abuuro xiise iyo dhaqdhaqaaq. Waxaad halkaan ku arkaysaa soo-jeedinno shaqadaas qaabayn kara:

- Qodobbada guddiga waalidka iyo golaha wadashaqaynta
- Jadwal-sanadeedka oo leh arrimo joogto loogu soo qaado
- Qorshaha shirarka ee sanadka oo dhan waxaa lagu dejinayaa shirka koowaad
- Nidaam doorasho oo tayaysan: Nidaamka cidda la dooranayo iyo sida loo dooranayo. Tusaale ahaan in ay waalidka cusub xannaanada carruurta bartaan ka hor inta aan la dooran ama in marka hore loo doorto ku-simeyaal
- Shirar: Halkee, Sidee, Marar intee dhan, Yaa lala qaadanayaa
- Waxaa wanaagsan in aad ka fikirto isku dhafnaanta shirarka iyo in la kala duwanaado ayada oo tusaale ahaan loo eegayo xiisaha, asalka, meesha laga soo jeedo, degaanka iyo khibradda waalidka xannaanada carruurta
- Hawlaha FAU waxaa wanaagsan in loo kala qaybiyo kooxaha waalidka, si qabanqaabinta iskaa-wax-u-qabsashada iyo firfircoonida ay dad kala duwan u qabtaan
- Xeerarka shirarka
- Marinka kiiska:

  Guddiga waalidka > FAU > Golaha wadashaqaynta > Mulkiile

  Xannaanooyinka carruurta ee degmada: maammul > hoggaanka siyaasadda
  Xannaanooyinka carruurta ee gaarka loo leeyahay: Mulkiile/shirkad/hay'ad

U goggol xaar sidii loo abuuri lahaa bey'ad wanaagsan oo lagu wada shaqeeyo adiga oo adeegsanaya furfurnaan iyo in laysku kalsoonaado. Abuur nidaam wanaagsan oo arrimaha looga baaraandego laguna xalliyo cabashooyinka.

Qodobbo

Guddiga waalidka ee xannaanada carruurta ee Vilberg ee degmada Eidsvoll ayaa diyaarisay qodobbada iyo jadwal-sanadeedka hawlaheeda:

In badan wada hadla

§ 1 – GUDDIGA WAALIDKA
Dhammaan waalidka ay carruurtu u dhigtaan xannaanada carruurta, xubin ayay ka yihiin guddiga waalidka. Guddiga waalidku wuxuu ka shaqaynayaa sidii uu is-afgarad uga dhex dhici lahaa guriga iyo xannaanada carruurta, carruurtana loogu abuuri lahaa farxad iyo horummar wanaagsan.

§ 2 – GOLAHA FULINTA EE GUDDIGA WAALIDKA (FAU)
Golaha fulinta ee guddiga waalidku (FAU) waa gole fulin oo uu soo doortay guddiga waalidku kaas oo ah unugga fulinta ee guddiga waalidka. FAU wuxuu isku xiraa waalidka iyo xannaanada carruurta. FAU wuxuu hubinayaa in ay waalidku saamayn dhab ah yeeshaan, oo ay qayb ka qaataan in bey'adda waxbarashada ee carruurtu ay noqoto mid wanaagsan oo ammaan ah.

§ 3 – DOORASHADA IYO DHISMAHA
Doorashada xubnaha cusub ee FAU waxay dhacaysaa shirka waalidka ee furitaanka sanadka cusub ee xannaanada carruurta. FAU iyada ayaa isku dhisaysa shirka koowaad, islamarkaana dooranaysa hoggaamiye, hoggaamiye ku-xigeen, khasnaji, xoghaye, xubnaha guddiga- iyo matalayaasha SU.

§ 4 – GUDDIYO
Guddi-hoosaadyo ayaa FAU loo dooran karaa, kuwaas oo ka shaqeeya hawlo gaar loogu qeexay ama mashruucyo.

§ 5 – SHIRAR
FAU 6 shir ayuu yeelanayaa inta lagu jiro sanadka xannaanada carruurta ama marka ay ugu yaraan saddex xubnood taas dalbaan.

§ 6 – HAWLO
- In laga shaqeeyo wadashaqayn wanaagsan oo dhex marta guriga iyo xannaanada carruurta
- In la abaabulo habeenno mawduucyo laga hadlo, shirar ay waalidku uga doodaan arrimaha markaas taagan ee xannaanada carruurta khuseeya
- In la abaabulo iskaa-wax-u-qabsashada gu'ga iyo dayrta

§ 7 – DHAQAALE
FAU waa u madaxbannaan tahay in ay isticmaasho dhaqaalaha ka soo baxa qabanqaabooyinka ay abaabulaan guddiga waalidka/FAU. Waxaa wax lagu bixin karaa keliya waxyaalaha ay sida tooska ah uga faa'iideysanayaan ilmaha xannaanada carruurta.

§ 8 – WAAJIBKA XOGQARINTA
Qodobbada Xeerka maammulka §§ 13 ilaa 13f ee ku saabsan waajibka xogqarinta, ayay soo hoos gelayaan xiriirka waalidka iyo guddiyada xannaanada carruurta (Xeerka xannaanada carruurta § 20).

§ 9 – WAX KA BEDDELIDDA QODOBBADA
Sanadkiiba mar ayaa qodobbada dib loo eegayaa. Soojeedinta wax ka beddelidda qodobbada waa in si qoraal ah loogu diraa FAU. Beddelaadda waxaa la hor keenayaa shirka guddiga waalidka, halkaas oo lagu ansixinayo/ama lagu diidayo.

Jadwalka sanadka

BIL	FIRFIRCOONI	
Sibteembar	Shirka FAU	
Oktoobar	Iskaa-wax-u-qabsashada dayrta	
Nofeembar	Shirka FAU	
Diseembar		
Jannaayo	Shirka FAU	Shirka SU
Febraayo	Maalinta firfircoonida	
Maarso	Codsiga dabbaasha	Shirka FAU
Abriil	Iskaa-wax-u-qabsashada gu'ga	Shirka SU
Maajo	Shirka waalidka	Shirka FAU
Juun	Gabagabada xagaaga	
Luuliyo		
Ogoosto		

Arrimaha

Xannaanada carruurta ayaa waalidka ku wargelinaysa arrimaha hadba markaas taagan. Waxaad halkaan ku arkaysaa tusaalaha arrimaha lagu soo qaadi karo guddiga waalidka iyo golaha wadashaqaynta

- Miisaaniyad, xisaab
- Socodsiinta
- Tayada xannaanada carruurta
- Waxyaalaha micnaha ku fadhiya
- Ra'yi aruurinta isticmaalayaasha
- Shaqaalaha
- Maammulka xannaanada carruurta
- Wakhtiyada furitaanka
- Xannaanooyin carruur oo xagaaga xiran
- Isticmaalka ku-simayaasha
- Bey'adda cilminafsiga iyo bulshada
- Ammaanka xannaanada carruurta

Arrimaha sida gaarka ah xeerka loogu sheegay waa miisaaniyadda, socodsiinta iyo isticmaalka bedka.

Guddiga waalidku wuxuu:

- Wuxuu ka baaraandegayaa su'aalaha la xiriira lacagta ay waalidku bixinayaan ee ka badan xadka sare

Golaha wadashaqayntu wuxuu

- Ka hadlayaa mararka laga leexdo sidii caadiga ahayd ee shaqaalaha barbaarinta
- Dejinayaa qorshaha sanadka

Waxaa mararka qaarkood adkaan karta in la garto in ay arrini hoos tageyso guddiga waalidka/SU.

Waxaa qaaciddo la raaco noqon karta in haddii ay arrintu ku saabsan tahay ilmahaaga oo keliya, waxaad markaas kala hadli kartaa madaxa barbaarinta/maammulaha. Laakiin haddii laga yaabo in ay arrintu khuseyso carruur/waalid badan ama ay mabda' ahaan muhiim u tahay, waxaa markaa lala qaadi karaa guddiga waalidka/SU.

Talooyin

Talooyin ku socda waaliddiinta wakiilka loo doortay

- Wadajirka ka qaybqaado
- Sameeya fayl ama wax la mid ah oo halkaas ku aruuriya warbixinta shirarka iyo firfircoonida oo dhan
- Waalidka u qabta shirar gooni ah oo looga hadlo mawduucyada markaas taagan ee ay waalidku xiisaynayaan, ayna wanaagsan tahay in la falanqeeyo.
- Shirar joogto ah la qaata maammulaha

Talooyin ku socda maammulaha

- Ahow mid furfuran oo wax dhegeysta
- Warbixin fiican oo dhammaystiran ka bixi unugyada waalidka oo tusaale ahaan ku bixi shirka koowaad ee waalidka cusub
- Shirar joogto ah la yeelo madaxa guddiga waalidka
- Waalidka ku boorri in ay yeeshaan shirar ayaga gaar u ah
- Madaxa guddiga waalidka sii furo xannaanada carruurta oo asaga u gaar ah
- Si firfircoon u isticmaal FAU iyo SU

Talooyin ku socda mulkiilaha xannaanada carruurta

- Ka qaybqaado shirarka SU
- Ahow mid warbixin fiican baxsha, wax dhegeysta oo xiise muujiya
- Xannaanooyinka carruuraha ee mulkiilaha xannaanada carruurtu inta badan siyaasad ahaan loogu matalo SU, waa in uu wakiilku aqoon fiican u leeyahay arrimaha xannaanooyinka carruuraha oo uu mulkiilaha si wanaagsan u matalaa, oo uu warbixin dhiibi karaa su'aalahana ka jawaabi karaa.

Haddii uu xiriirka waalidka iyo shaqaaluhu wanaagsan yahay, midka shaqaalaha iyo carruurtuna waa wanaagsanaanayaa

Foto Colorbox

Talooyin intaan ka badan ka eego bogga internetka ee FUB: www.fubhg.no

Buug-yaraha waxaa diyaariyay Golaha waalidka ee xannaanooyinka carruuraha (2020).